



Ogolaanshaha Faahfaahsan ee Virtual Care

Magaca Bukaanka:
Taariikhda Dhalashada:
CPI#:
ACCT#:
MR#:

Macluumaadka Guud

- Balamaha aad la yeelanayso adeeg bixiyaha waxaa lagu qaban doonaa barnaamijka onleenka ah ee Virtual Care ayadoo la adeegsanaayo softwareerka shirka muuqalka ah oo leh qayb cod ah taasoo taala Xarunta Caafimaadka ilmaha ee Gillette Children's Specialty Healthcare Clinic. Xubin kamid ah kooxda caafimaadka ayaa joogi doona muddada balanta si uu u kaalmeeyo dhakhtarka.
- Qaybta Daryeelka Onleenka ah (Virtual Care) ayaa abuuraysa xidhiidhka bukaanka adeeg bixiyaha daryeelka caafimaadka rasmiga ah ee loo adeegsan jiray qiimaynta joogtada ah, baaritaanada, daawaynta, iyo/ama daawada lagu qoro si lamid ah markaad tooska ugu tagi jirtay.
- Gillette waxay adeegsan doonaa Qaasista Caymiska Caafimaadka iyo Xeerka La xisaabtanja (Health Insurance Portability and Accountability Act, HIPAA) sooftiweerka ilaashan si loo hubiyo in macluumaadkaaga caafimaadka ilaashan ay ka xafidan tahay gelida aan la oggolayn iyo qaab xil qarín leh loo ilaasho.
- Dukumiintigaan waa foomka ogolaanshaha ee daawaynta laguugu samaynaayo Daryeelka Onleenka ah.

Xadidaadaha Daryeelka Oonleenka ah (Virtual Care)

- Marka aanay suuragal ahayn in la fisho xadidnanta dhammaan daawayn kasta, waa inaad ka fakarto arimaha soo socda markaad ogolanaysa daawayn laguugu samaynaayo Daryeelka Onleenka ah (Virtual Care):
 - o Qalabka muuqaalka codka Daryeelka Oonleenka ah (Virtual Care) ayaa gali kara cilad farsamo.
 - o Marka la qaadayo feejignaan kasta si loo xaqiijiyo xogta bukaanka loona dhawro sirta xogta, sifada balamaha onleenka ah ayaa keenaysa inaad si dheeraad ah khatar ugu jirto in xogta la jabsado.
 - o Daryeelka oonleenka ah (Virtual Care) ayaa laga yaabaa inuusan ku haboonayn xanuunada qaarka u baahan daryeel heer sare ah.
 - o Alaabaha la xakameeyo ayaa u baahan saxeexa dhakhtar/kalkaalisada oo lagu qoro daawada dhabta ah ee lagu qoro laguma samayn karo arintaan qaab oonleen ah (waxay u baahanaysaa in boostada lagusoo diro). Fadlan noo ogolow ugu yaraan 10 maalmood oo shaqo si laguugu buuxsho daawada.

Dookhyada Badqabka iyo Daawada Beddelka ah

- Ayadoo Daryeelka Oonleenka ah (Virtual Care) caadiyan lagu sameeyo qaab fogaan ah, nidaamyada badbaadada iyo farsamooyinka kale ee helitaanka caawimaada ayaa si faahfaahsan lagaga hadli doonaa intaad la hadlayso dhakhtarka. Waxaad dooran kartaa inaad daawo ku doonato qaab dhaqameed, ee booqashada xafiiska oo aad ugu tagto dhakhtar kale.

Xaquuqaha iyo Waajibaadka Adeeg bixiyaha iyo Bukaanka

- Daryeelka Takhasuska Caafimaadka Ilmaha ee Gillette waxaa u dhowraa xuquuqda qiimaynta saxnaanta iyo habooniinta dadka ka qaybgalaaya Daryeelka Onleenka ah (Virtual Care) sabab la xariirta xadidnaanta nooca daawaynta eeqaab ahaan kor lagu xusay.
- Inaad daawayn ku raadsato Daryeelka Onleenka ah waa go'aan aad adiggu gaarayso. Haddii aad doorato inaad ka laabato go'aankaaga aadna raadsato daawayn taas badal u ah, waxaad ka laaban kartaa ogolaanshahaaga waqtigaad doonto. Dabcan, waxaan ku talinaynaa inaad go'aankaan kala hadasho adeeg bixiyaha marka koobaad. Waxaan sidoo kale ku talinaynaa abuurista xariirka aad la samaynayso adeeg bixiyahaaga labaad kahor intaadan joojin ogolaanshahaan si aad u buuxiso dol daloolooyin dawaynta quseeya oo dhan ta.
- Haddii ay jirto khatar degdeg u dhici karta, adeeg bixiyaha ayaa sharciyan iyo anshax ahaanba awood u leh inuu xogta u gudbiyo dawlada, xubnaha qoyska, ama cid kale, si loo yareeyo khatarta imaan karta.
- Waa masuuliyad saaran bukaanka inuu yimaado waqtiga balanta loo qorsheeyay. Haddii bukaanku soo daaho wax ka badan 5 daqiiqo, balanta ayaa u baahan karta in dib loo dhigo. Go'aankaan waxaa u madax banaan dhakhtarka.

Ogolaanshaha

- Waxaan fahmayaa inaan ogolaanaayo qiimaynta iyo daawaynta la iigu samaynaayo Daryeelka Onleenka ah (Virtual Care).
- Waxaan fahmayaa inaan natiijo kasta ahayn mid la damanaad qaadi karo, ayadoo ay jirto dadaalada ugu badan ee aan galinayno bixinta daryeelka.
- Waxaan fahmayaa inaan awoodo inaan su'aalo ku saabsan Daryeelka Onleenka ah (Virtual Care) ama waxyaabo kasta oo baaritaan iyo daawayn kamid ah markaan doono.
- Waxaan fahmayaa inaan joojin karo daryeelka la igu siiyo Daryeelka Oonleenka ah (Virtual Care) waqti kasta.
- Waxaan xaqiijinayaa inaan akhriyay aana fahmay gebi ahaanta dukumiintigan ciwaankiisu yahay "Ogolaanshaha Daryeelka Onleenka ah (Virtual Care)".
- Waxaan fahmayaa aana aqbalayaa in ogolaanshahaan uu sii shaqayn doono ilaa inaan ogolaanshaha ka laabto maahee si qoraal ah.

Saxiixa Bukaanka

Taariikhda/Waqtiga

Saxiixa waalidka ama masuulka sharciga ah Taariikhda/Waqtiga

Waqtiga: _____

Ogolaanshaha Hadalka oo uu helay (Magaca, Taariikhda, Darajada)

0116-001
7/18, 11/18, 3/20